Iskoolka dadka waaweyn

Iskoolka dadka waaweyn waxaa loogu tala galay haddii aad dooneysid inaad soo kabato koorsooyin dugsiga hoose dhexe ama kuwa dugsiga sare. Waxaad akhrisan kartaa hal koorso ama koorsooyin badan si aad tusaale ahaan ugusii gudubtid waxbarasho heer jaamacadeed ah ama si aad shaqo u heshid.

Waxyaabahaan ayaad ka sameyn kartaa iskoolka dadka waaweyn:

- waxaad akhrisan kartaa koorsooyin dugsiga hoose dhexe iyo kuwo dugsiga sare ah
- Waxaad qaadan kartaa shahaadada dugsiga sare (shahaado shaqo aad ku raadsan kartid ama mid ogolaansho kuu siineysa inaad dhigatid waxbarasho heer jaamacadeed ah)
- Inaad dhameystir ku sameysid maaddooyinka kaa dhiman si jaaniskaada uu kor ugu qaadmo.
- inaad dhigatid waxbarasho leh qeybo aad baraktiik ahaan ugu shaqeyneysid goob shaqo. (qeyb waxbarashada ka mid ah waxaa lagu qaadanayaa goob shaqo)
- Inaad waxbarashada dib ugu laabatid (waxbarasho cusub oo aad shaqo kale ugu shaqeyn kartid)
- In imtixaan lagaaga qaado maaddo aad rabtid inaad natiijo ku heshid
- In aqoontaada qiimeyn lagu sameeyo kadibna shahaado ahaan laguu siiyo.

Ma rabtaa inaad warbixin dheeraada ogaatid?

Waxaad la xiriirtaa la taliyaha dhinaca waxbarashada ee degmadaada si aad u ogaatid fursadooyinka waxbarasho ee laga helo degmadaada. Macluumaadka qolada aad la xiriireysid waxaad ka heli kartaa degmada boggeeda internetka.

Yaa wax ka baran kara iskoolka dadka waaweyn?

Laga billaabo 1da luuliyo sanadka aad 20 sano buuxineysid waxaad wax ka baran kartaa iskoolka dadka waaweyn. Si laguugu ogolaado waa inaad degantahay wadanka Iswiidhan isla markaana aad heysataa waxbarashada leeskaga baahanyahay si aad ugu najaxdid waxbarashada. Mararka qaar waad billaabi kartaa iskoolka haddii eey da'daada ka yartahay 20 sano.

Xaq ayaad u leedahay waxbarashada heerka dugsiga hoose dhexe

Haddii aadan heysan waxbarashada heerka dugsiga hoose dhexe waxaad xaq u leedahay inaad ku dhigatid iskoolka dadka waaweyn. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad buuxisid shuruudaha kale ee leeskaga baahan yahay si aad u dhigatid iskoolka dadka waaweyn (shuruudaha leeskaga baahan yahay kor ka fiiri).
Degmadaada haddii eysan heeyn koorsooyinkaas waxaad xaq u leedahay inaad ka akhrisatid degmo kale oo koorsooyinka laga dhigto.

Xaq ayaad u leedahay waxbarashada heerka dugsiga sare

Xaq ayaad u leedahay inaad wax ka baratid iskoolka dadka waaweyn haddii aad buuxineysid shuruudaha leeskaga baahan yahay si loo helo ogolaansho waxbarasho oo laga dhigto iskoolka dadka waaweyn. Markaas wax xulasho ah lama sameynaayo oo waxaad boos dammaanad qaadan ku leedahay iskoolka dadka waaweyn. Xaqqaas dammaanad qaadka ah waxaa soo hoos yimaada ogolaanshaha asaasiga ah iyo mid khaas ahaaneed labadaba.
Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo buuxsado shuruudaha soo gelidda waxaad ka akhrisataa qeybta Xirfadda badal ama buuxso shuruudaha ogolaanshaha soo galidda.

Marka boosaska dugsiga sare eeysan dadka ku filneyn

Haddii eey dad badan oo buuxinaya shuruudaha soo galitaanka barnaamij waxbarashadeedka dugsiga sare eey soo wada dalbadaan hal barnaamij waxbarashadeed waxeey degmada sameeyneysaa xulitaan eey ku kala saareyso dadka soo dalbaday kadibna ayada ayaa go'aamineysa dadka la qaadanayo. Soo xulidda marka la sameynayo waxaa mudnaanta koowaad la siiyaa haddii aad tahay qof heysta waxbarasho hore oo gaaban isla markaana:
1. Raba inuu dhameeysto waxbarashada ayadoo la raacayo qorshihiisa waxbarasho ee khaaska u ah.
2. U baahan inuu dhameystir ku sameeyo natiijooyinkiisa ama
3. U baahan waxbarashada si uu ugu isticmaalo shaqadiisa ama uu ugu baahan yahay waxbarasho heer jaamacadeed ee uu rabo inuu mustaqbalka dhigto

Machadka dadka waaweyn – qaab waxbarasho oo lagu beddelan karo

Koorsooyinka ogolaanshaha ku siinaya ee machadka dadka waaweyn waxeey noqon karaan ogolaansho u dhigma sida kuwa dugsiga sare iyo kuwa iskoolka dadka waaweyn.

In wax laga barto dugsiga waxbarashada dadka waaweyn ee degmada

Sidaan ayeey waxbarashada u dagsantahay

Dugsiga waxbarashada dadka waaweyn ee degmada waxuu aalaaba hiigsanayaa inuu waxbarashada waafajiyo baahida aad qabtid. Waxaad kororsaneysaa aqoon iyo khibrado labadana waxaa laga helaa waxbarashada.

Waxaa jira fursado uu qofka hal gallin uu wax ku baran karo iyo waliba waxbarasho masaafadeed. Waxaa kaloo jira koorsooyin aad dhigan kartid, koorsoyin aad qaar ka dhigan kartid iyo waliba koorsooyin qaarkood oo aad goob shaqo ku baran karto. Haddii aad buuxisid shuruudaha ogolaanshaha isla markaana aad kasoo bixi kartid waxbarashada waxaa jira fursado aad ku akhrisan kartid maaddooyin kala duwan. Tusaale ahaan inaad waxbarashada dadka waaweyn aad la dhigatid koorsooyin waxbarasho oo luqadda iswiidhishka dadka waaweyn ah (sfi).

Haddii aad dhigatid dugsiga waxbarashada dadka waaweyn ee degmada isla markaana aan heysan aqoon kugu filan oo xaga luqadda iswiidhishka ah waxaa jira fursad aad ku akhrisan kartid koorsooyinka qaar oo luqaddaada hooyo ku baxaayo. Isla markaana waxaad fursad laguu siinayaa inaad tababar ku sameysid luqaddaada iswiidhishka ah. Degmadaada kala xiriir wixii warbixin dheeraad ah..

Qorshe waxbarasho oo gaar ahaaneed

Adiga ka arday ahaan waxaad leedahay qorshe waxbarasho oo adiga khaas kuu ah. Iskoolka ayaa jaangoynaya qorshaha waxbarasho isagoo adiga kula kaashanaya. Waxuu qorshaha ka koobanyahay:

- hadafkaada waxbarasho (tusaale ahaan hadduu hadafkaadu yahay inaad qaadato shahaadada dugsiga sare waa ineey ku qorantahay borograamka aad rabtid inaad dhigatid) iyo
- waxbarashadaada dhirirkeeda inta ee la egtahay.

Qorshahaada khaaska ah waa la baddali karaa haddii aad rabtid inaad koorsooyin badan akhrisatid ama haddii aad rabtid inaad beddeshid hadafkaada waxbarasho inta lagu guda jiro waqtigaada waxbarashada.

Natiijo
Natiijooyinka lagu uu isticmaalo dugsiga waxbarashada dadka waaweyn waa A-F, waa sida tan laga isticmaalo dugsiga hoose dhexe iyo tan dugsiga sare. A waa natiijada ugu sarreeyso F:na waa marka uu qofka ku dhaco. Koorso kasta markeey dhamaato ayaa natiijo lagu helaa. Aqoontaada waxaa lagu xaqiijinayaa oo lagu qorayaa shahaadadaada.

Xirfadda badal ama buuxso shuruudaha ogolaanshaha soo galidda

Shahaaddo cusub
Waxaa jira fursad aad ku qaadan kartid shahaaddo xirfadeed cusub haddeey waxbarashada aad shahaadada ka qaadaneysid eeysan u ekeen waxbarasho aad hore shahaaddo ugu soo qaadatay. Arrinkaan waxuu quseeyaa haddii uu qofka heysto shahaaddo uu ku gali waxbarasho heer jaamacadeed ah laakiin raba inuu barto barnaamij waxbarasho oo qofka inuu shaqeeyo u diyaarinaya. Laakiin qofka ma heli karo shahaado cusub oo uu ku gali karo waxbarashada heer jaamacadeed ma qaadan karo haddii uu hore u heystay shahaadada dugsiga sare.

Shuruudaha ogolaanshaha oo la dhameystirto
Xaq ayaad u leedahay inaad wax ka baratid iskoolka dadka waaweyn haddii aad buuxineysid shuruudaha leeskaga baahan yahay si loo helo ogolaansho waxbarasho oo laga dhigto iskoolka dadka waaweyn. Shuruudaha ogolaanshaha soo gelidda ee aad xaqqa u leedahay inaad akhrisatid waa:

- Ogolaanshaha soo gelidda asaasiga ah ee waxbarasho jaamacadeed oo heerka koowaad ah
- Hal ama ogolaanshayaal badan oo soo gelid oo khaas ah, khuseysana waxbarasho jaamacadeed heerka koowaad ah
- Ogolaanshaha soo gelidda asaasiga ah ee waxbarasho machadka farsamada ah
- Hal ama ogolaanshayaal badan oo soo gelid oo khaas ah, khuseysana waxbarasho machadka farsamada ah

Waad buuxsan kartaa shuruudo badan oo kuu ogolaanayo inaad soo geshid waxbarasho kala duwan laakiin waa inaad mid mid u akhrisataa. Waa inaad heysataa shuruudaha ogolaanshaha soo gelidda ee aasaasiga ah inta aadan akhrisanin shuruudaha ogolaanshaha soo gelidda khaaska ah.

Si aad shuruuudaha ogolaanshaha uga buuxsatid iskoolka dadka

waaweyn waa inaad heysataa ogolaansho aad wax uga baran kartid iskoolka dadka waaweyn. Warbixin dheeraad ah oo arrintaas ku saabsan waxaad ka akhrisataa Yaa wax ka baran kara iskoolka dadka waaweyn. Haddii aad rabtid inaad maaddooyin buuxsatid si aad u buuxiso shuruudaha soo gelidda waxbarashada heerarka machadyada farsamada ama jaamacadaha waxaad u tagtaa xafiiska degmadaada, ayada ayaa mas'uul ka ah in eey waxbarasho ku siiso.

Imtixaan iyo qiimeyn

Imtixaan

Haddii aad rabtid inaad natiijo ka heshid maaddooyinka laga dhigto dugsiga waxbarashada dadka waaweyn, wadankana aad degantahay waxaad xaq u leedahay inaad imtixaan ku gashid koorsooyinka imtixaan lagu galo oo dhan. Imtixaan waxaad kaloo ku gali kartaa qoraal cilimiyeedka lagu sameeyo dugsiga sare. Imtixaanka waxaa kaliya oo lagu sameyn karaa degmo qabanqaabisa imtixaanka koorsada aad rabtid inaad imtixaan ku gashid. Waxaa jira fursad aad imtixaan ugu sameyn kartid koorso aad hore natiijo ugu heshay.
iskoolka waxaa fursad loo siinayaa inuu khidmad ku qaato diyaarinta uu diyaarinayo imtixaanka. Khidmadda ama kirada ma dhaafi karto 500 oo karoon.

Lacag lagama qaadi karo
• haddii aad tahay arday dhigta dugsiga dadka waaweyn isla markaana ku dhacay koorsada imtixaanka lagu sameynayo ama
• ama haddaad tahay arday dhigta dugsiga dadka waaweyn isla markaana baaritaan lagu sameeyay natiijooyinkiisa hore darteed imtixaan u sameynaya.

Imtixaan laguugu tala galay haddii aad dhigtid dugsiga sare
Haddii aad tahay arday dhigta dugsiga sare waad ku sameyn kartaa imtixaan dugsiga dadka waaweyn haddii aadna natiijo ka heysan koorsada aad imtixaanka ku galeysid ama maaddada qoraal cilmiyeedka ee dugsiga sare ama haddii aadan ku baasin maaddada. Haddii aad koorso ku heysatid ugu yaraan natiijada E, imtixaan kuma sameyn kartid koorsadaas illaa aad ka qalin jabisid dugsiga sare.

Qiimeyn – in qiimeyn lagu sameeyo aqoonta aad hore usoo dhigatay

Waxaa jira fursad laguugu qiimeynayo laguugana dokumentigareeynayo

waxbarashada iyo khibradaha aad hore usoo baratay. Ujeedada qiimenta loo sameynayo waxeey ahaan kartaa:

• inaad rabtid inaad waxbaratid oo aad is waafijisid waxa eey waxbarashada ka koobantahay iyo mustawaheeda si aadan u akhrisanin wixii aad horay usoo baratay
• inaad soo gaabisid waqtiga waxbarashada
• inaad dokumentigareeysatid waxbarashadaada si aad u tusisid tusaale ahaan marka aad leedahay waraysi shaqo.

Haddii aad rabtid inaad qiimeyn ku sameysid waxbarashadaada, waxaad la xiriirtaa degmadaada.

H

Skolverket

Utbildningsinfo

ENGLISH – ENGELSKA